

Warbixin ku saabsan hawlgallada ([SSPF] waxaad kala xiriiri kartaa iskuduweha [SSPF] oo ah:

Anna Lindestig
anna.lindestig@ostersund.se

072-502 29 58



**Wadashaqaynta maamullada dugsiyada,
maamullada adeegga bulshada, ciidanka
booliska iyo maamullada goobaha
wakhtilummiska.**

**Waa taageero loogu talagalay qoysaska
dhallinyarada da`dooda u dhaxayso 12-16
sano.**

SSPF

Macnaha [SSPF] waa wadashaqaynta (maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska) oo xiriir la leh ammuraha dhallinyarada da`dooda u dhaxayso 12-16 sano .

Sirta xirfadda

Wadashaqaynta [SSPF] waxay ku salaysan tahay in xilhaayaha xannaanadda/waalidka, u qoraal ku muujiyo in uu raali ka yahay in, hawlwadeneeyada maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska, ay is-waydaarsan karaan wixii warbixin ah oo ku saabsan da`yarka, taasoo lagamaarmaan u ah wadashaqayntooda.

Hadafka

In da`yarku uu helo dugsi-dhigasho aan caqabado lahayn, oona ku noolado noolol aan lahayn maandoorieyaasha iyo dambifallada.

Ujeedada

[SSPF] waa madal laysku waydaarsado xogta, oo ujeedadeeda tahay in la shaacbiyiyo ilmaha iyo dhallinyarada laga cabsi qabo in ay ku dhacaan wadada dambiileyaasha. Hawlwadeneeyada maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska waxay la wadashaqaynayaan xilhaayaha xannaanadda/waalidka iyo da`yarku, taasoo u jeedada tahay in mudnaanta koowaad la siiyo horumarka wanaagsan ee da`yarka.

Goorma la hirgeliyaa wadashaqaynta [SSPF]?

Waxaa la hirgeliyaa markii laga walwalsan yahay arrimaha hoos ku xusan:

- Laga shakisan yahay dambifalalka (dhac, xoog muquunis, xatooyo iwm)
- Isticmaalka/iibinta khamriga iyo/ama maandooriye
- U tago goobaha aan habboonayn/bay`adaha aan wanaagsanayn
- Laga walwalsan yahay nooca saaxiibada uu xiriirka la leeyahay
- Dugsi ka maqnaansho

Sidee?

Wakiil ka socdo mid kamid wadashaqaynta maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska, wuxuu wargelinayaa xilhaayaha xannaanadda/waalidka kaddib ka codsanayaa oggolaansho. Qoraalka oggolaanshada waxaa kaddib lagu wareejinayaa iskuduweha, kaaasoo ka codsan doono maamullada dugsiyada, maamullada adeegga bulshada, ciidanka booliska iyo maamullada goobaha wakhtilummiska foomka lagu qiimeeyo halista jirta in ay buuxiyaan. Kaddib markii la helo qiimaynta urursan waxay kooxda hawlgallada go`aan ka gaarayaan haddii [SSPF] la hirgelin doono iyo in kale ama haddii nooc taageero kale loo baahan yahay.

Markii qof ama dhacdo lagu qiimeeyo in loo baahan yahay wadashaqaynta [SSPF] sidatan ayuu maamulka Dowladda hoose Östersund u hawlgala:

- Iskuduweha wuxuu la kulma xilhaayaha xannaanadda/waalidka iyo da`yarka, kaddib waxay ka xaajoodaan xaaladda markaas jirto – heerkeeda/ baahideeda, qiimaynta shabakada iyo qeexida hadafka.
- Iskuduweha wuxuu isugu yeera kulanka shabakada wadajir da`yarka arrinta ay khuseeyso, waalidkiisa iyo dadyoowga kale ee lug ku leh arrinta da`yarka, sida tusaale dadyoowga dugsiyada, goobaha wakhtilummiska, maamulka adeegga bulshada iyo xubnaha qoyska waa haddii maslaxad ugu jirto.
- Markii la wada kulmo waxaa wadajir loo dejiya qorshe waxkaqabasho ku salaysan, kaasoo ku xusan hadaf aad u qeexan oo da`yarka u gaar ah. Tan kale, qoraalka qorshaha waa in lagu qora nooca hawlgallada lagu dhaqaaqi doono, goorta iyo qofka iyo taariikhda la tixraaci doono qorshaha.
- Iskuduweha ayaa mas`uul ka ah in dhammaan la wargeliyo qaybaha qorshaha waxkaqabashada iyo taageero haddii loo baahdo.

Arrinta [SSPF] waxaa la soo gabgabayn doonaa markii kooxda hawlgallada iyo/ama qoyska arrinta ku qiimeeyo in baahidii loo qabay [SSPF] aysan sidii berri hore u jirin.